



Ilaahay wuxuu faray in shay walba loo ixsaan falo

Shadaad Binu Aws Allaha ka raali ahaade wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay scw labo ayaan ka xifdiyey isagoo dhahaya: "Ilaahay wuxuu faray in shay walba loo ixsaan falo, hadii aad wax dilaysaan dilka wanaajiya, hadii aad gawracaysaan gawraca wanaajiya, mididana afeeya, oo neefka u raaxeeya.

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Nabigu scw wuxuu sheegay in Ilaahay nagu waajibiyey inaan shay walba u ixsaan falo, Ixsaankuna: waa in Ilaahay si joogto inoo ilaalinaayo, oo uu eegaayo caabududiisa, bixinta khayrka, dadka oo dhibka laga daayo, ixsaankaas waxaa soo galaya dilka iyo gawraca. Ixsaanka qisaastu waa: in loo dooro dariiqa ugu sahlan oo ugu fudud oo ugu dhaqso badan oo nafta looga goyn karo kan la dilaayo. Ixsaan falka gawracu waa marka la gawracyo: oo waa in loogu naxariisto neefka in la afeeyo midida, oo aan hortiisa lagu afayn isagoo eegaya, oo xoolo kale oo u jeeda aan la gawricin.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/4319>

